

## Bayaanka Farshaxaniistaha Leah Yellowbird

Xiritaanka meesha banaan ee u dhaxeyso dhaqamada waxay aheyd hadafka qeybtaan.

Shaqooyinka farshaxanka asalka ah waxaa markii koowaad lagu meeleeyay darbiyadaan waxay dhab ka aheyd nolol maalmeedka dagayaasha, oo aragtida farshaxaniistaha asalka ah. Waxaan naqshadeeyay qeybteyda oo aragtida qofka Anishinaabe ah oo ku dhashay iyo ku noolaa aaga inta lagu jiray muddada isla waqtiga sida sawirada darbiga. Naqshada waa waxa qof dhalad ah diirada saari lahaa, dhulka geedaha, halka ay ku noolyihiin iyo sida ay u noolyihiin, iyo waxa ay u arkaan iyo ay ku dareemaan raaxo maalin walba.

Dhiirogelinta qeybta waa joog luga xirashada ragga Anishinaabe. Luga xirashada vintage waxaa asal ahaan la sameeyay qiyaastii isku waqtiga saraawiisha asalka ah lagu sameeyay darbiga, marka waxaan rabay inaan isticmaalo naqshadaha iyaga ka imaanayo, iyo sida looga dhigo naqshada waxa weli ka ah dhab dhaqanka dadka dhaladka. Markii aan helay luga xirashadaan, aad ayaad u murugeysnaa inaan ku arko iibinta oo waxaan u baahnaa inaan guriga iyaga keeno. Waxaan ka iibsaday qof iyaga horay u baakideystay, oo ii sheegay in qaraabo qaar uga soo iibiyeen safar ay ku aadeen Minnesota inta Lagu jiray 1930-1940-yadii, taas oo taabatay qalbigeyga. Dadka dhaladka oo badan waqtigaas waxay iibiyeen dharka dhaqanka qurxoon oo la helayay. Murugada aan dareemay waxay aheyd sameynta wareeg buuxo markii ay ii suurtogaleysay inaan dib ugu soo celiyo Minnesota. Waxaan ceshtay hal lug herasho oo la wadaagay midka kale xubin kooxda ka mid ah, oo waxaan labadoodaba oo naqshadeysan ka raaricinay guryaheena.

Tani waxay aheyd fursad aad aar u ah oo asalka lagu daboolayo asalka kale, labo aragtiyo kala duwan oo isku meesha ah - miD ka imaaday dadka dhaladka, iyo midka kale oo ka imaanayo ragga iyo dumarka oo dagan halkaan Minnesota. Farshaxankeyga wuxuu ku saabsanyahay qabashada qiyamyada dhaqanka oo u fasirayo iyaga qeyb aad u magaaleysan. MuHiim ayay ii tahay in dhaqanka uusan lumeynin xittaa. Dhibaato malahan isbadelada inaga nagu jirto sida dad ahaan waxaan dhammaanteen leenahay dabiici guud oo kala duwan oo na dajiyo.

**For more information on the Ramsey County Courthouse/St. Paul City Hall Council Chamber Art Project, full artists' statements and more, see https://www.rchs.com/news/chamber-art/**

RAMSEY COUNTY

R.C.H.S.
RAMSEY COUNTY HISTORICAL SOCIETY

SAINT PAUL